# Gurigii Cigaal

**Akhri oo sawir**

Gurigani waa kii Cigaal. Dhinaca midigta waxaa guriga ka taagan gaadhi.

Dhinaca bidixdana waxaa ku yaala aqal yar oo eyga lagu xareeyo. Aqalka eyga dhinaciisa waxa taagan ey .eygu waa ay yar midabkiisuna waa bunni. Eyaga dhinaciisa waxaa yaala kubbad midaba leh. Qiiqsaarta waxaa ka baxaya qiiq.

Aqalka dabadiisa waxaa yaala waxay caruurtu ku boodboodo.Cigaalna wuu ku boodboodayaa.



*Adobe Stock / Frank*

# Qolkii Caasha

**Akhri oo midabee**

Tani waa Caasha.Waxay leedahay timo dheer oo dahabi ah, waxayna gashan tahay toob cusub. Toobku waa jaalle. Kabuhu waa buluug.

Caasha waxay haysataa caruusad.

Caasha waxa dhinaceeda yaala kabadh. Kabadhka khaanadiisa ugu sareysa waxa saaran laba kubadood oo cagaar ah.Kabadhka khaanadiisa ugu hoosaysa waxa ku jira sanduuq ay ku jiraan shay ay carruurtu qaabab kala duwan u dhisaan.



Oxana Kopyrina / Adobe Stock / NAFO

# Baabuurkii Cigaal


**Akhri oo midabee**

Waa baabuurkii Jaamac ee cusbaa.

Jaamac wuu jecelyahay baabuurkiisa. Muraayadihiisu waa buluug. Taayirada iyo muraayadaha dhinacyaduna waa madow.

Baabuurka midabkiisu waa casaan /guduud.

Jaamac wuxu ku dhex jiraa baabuurka oo wuu wadaa.



*Raman / Adobe Stock*